

# Cadaynta Amaanada (Trust) Canshuur-ka-dhaafidda Guryaha Dadka Waayeelka ah iyo Dadka Naafada ah

Faylkan caddeynta ah u gudbi **Hay'adda Sheegashada Ka Cafinta Canshuurta Dadka Waaweyn iyo Kuwa Naafada Ah ee Canshuurta Guryaha (REV 64 0002)** haddii gurigaaga uu yahay hantida amaanada (asset of a Trust).

**Fiiro gaar ah: Foomkan ma abuurayo Amaanad (Trust). Waa in kaliya loo isticmaalaa ujeedooyinka sheegashada Ka-Cafinta Canshuurta Guryaha ee Dadka Waaweyn ama Dadka Naafada ah ee horey u ahaa hanti amaanad (trust).**



## Waxaa buuxinaya degmada

Magaca Degmada:

Lambarka Baarselka:

Lambarka codsiga ee Muwaadin waayeel ah/Qof qaba naafonimo:

## Waxaa buuxinaya codsadaha

Magaca codsadaha (far waaweyn):

Cinwaaka guriga:

Magaaladda/Gobolka/Furaha Boostada:

## Cadeyn - Fiiri tilmaamaha ku yaala dhinaca dambe ee foomkan.

Waxaan halkan ku caddaynayaa in guriga ku yaala lambarka dhulka ee kor ku xusan uu yahay hanti amaanad (asset of trust). Waxaa taa dheeraad u ah, waxaan caddeynayaa in amaanadda (trust) ay buuxineyso shuruudaha mulkiilenimada sida lagu qeexay ee hoosta yimaada (**calaamadeey mid**):

- WAC 458-16A-100(25)(a) — Waxaad qabsatay guri markii aad guriga ku wareejinaysay ururka/shirkadda ama guri noolaleed ayaa markii dambe lagu soo wareejiyey warqad guri (subarloogo). Ku soo lifaaq nuqulka warqada guriga (subarloogada).
- WAC 458-16A-100(25)(b) — Waxaad tahay Deganaha ama abuuraha amaanada (trust) (dib looga qaadi karo ama aan dib looga qaadi karin) waxaadna isa siisey danaha ka-faa'iideystaha ee guriga assaasiga ah, ama qeybtaa gaarka ah ee amaanada (trust), iyo in danaha ka faa'iidaysiga ay soconayaan ugu yaraan inta aad nooshahay.
- WAC 458-16A-100(25)(c) — Amaanada (trust) waa mid aan dib loo celin karin adigana waxaad tahay ka-faa'iideystaha. Waxaa lagu siiyay danaha ka-faa'iidaysiga ee qaybta guriga assaasiga ah ee amaanada (trust) ugu yaraan inta aad nooshahay.

## Ka fiiri sharciyada iyo shuruudaha dhinaca dambe ee foomkan si aad u hesho sharaxaad dheeraad ah.

**Fiiro gaar ah:** Waa inaad ku soo lifaaqdaa nuqul ah qaybta(qaybyada) ee amaanada (trust) ee muujinaya in amaanada (trust) ay buuxineyso shuruudaha mulkiilenimada.

## Waxaan cadeynayaa in waxa kor ku qoran ay run iyo sax yihiin.

Magaca qareenka codsadaha:

Saxeexa qareenka codsadaha:

Magaca codsadaha:

Saxeexa codsadaha:

Goobta:

Taariikhda:

Goobta:

Taariikhda:



Si aad u weydiiso helitaanka daabacaadan oo ah qaab kale ee loogu talagalay dadka aragtida liita, fadlan wac 360-705-6705. Istimaalayaasha Teletype (TTY) waxay isticmaali karaan Adeegyada Relay Washington iyagoo wacaya 711.

## Tilmaamaha

### Fadlan la xiriir Xafiiska Qiimeeyaha Degmadaada si aad u hesho wixii caawimaad ah oo la xiriira buuxinta foomkan.

Sharciga ma oggola in lahaanshaha guriga loo maro Urur iyadoo ujeedadu tahay in la buuxiyo shuruudaha mulkiilnimada ee Barnaamijka Cashuur-Ka-Dhaafida Guryaha Muwaadiniinta Waayeelka ah iyo DadkaNaafada ah. Si qiimeeyaha uu u go'aamiyo in aad buuxisay shuruudaha mulkiilenimada iyo in kale marka guriga uu yahay hantida amaanaada (trust), waa inaad bixisaa nuqul ah amaanaada (trust) (ama qeybaha amaanaada) oo caddaynaya in shuruuda mulkiilenimada la buuxiyey.

Waxaad buuxin kartaa foomkan adiga naftaada ama waxaad caawimaad ka codsan kartaa qareenkaaga. Si aad ugu qalanto ka-dhaafitaanka, waa inaad lahayd guriga wakhtiga aad buuxinaysay kharashka, hanti nololeed ahaan, ama qandaraas iibsi ahaan. Sidoo kale, heshiiska kirada ee nolosha ayaa loo aqoonsan karaa guriga noolasha (RCW 84.36.381(2)).

Sidaa darteed, si loo buuxiyo shuruudaha mulkiilenimada ee loogu talagalay barnaamijkan ka cafinta canshuurta hantida/guriga marka hantida ay tahay hanti amaanaad (trust), Amaanaddaas (trust) waa in ay muujisaa danta "guriga nolosha" ee guriga ay tahay in laga cafiyo qofka codsanaya ka cafinta canshuurta. Si loo buuxiyo shuruudahaas, mid ka mid ah waxyaabahan soo socda waa in la helaa:

- Danta guriga noloshada waa in uu haystay qofka codsanaya ka cafinta canshuurta markii hantida loo wareejinayay amaanaada (trust).
- Danta guriga noolasha waa in markii dambe lagu wareejiyey warqadda guriga (subarloogo) la siiyey qofka codsanaya ka cafinta canshuurta.
- Amaanaada waa in ay ku jirtaa luqad muujineysa danta guriga noolasha ee deganaanshaha si looga dhaafto qofka codsanaya ka cafinta canshuurta.

WAC 458-16A-100 (23), (25), iyo (26) ayaa caddaynaya shuruudaha mulkiilenimada:

**(23) Heshiiska nolosha oo dhan ah.** Hashiiska nolosha oo dhan ah waxaa loola jeedaa in heshiiska kiro uu joogsanayo marka qofka guriga ijaartay uu dhinto.

**(25) Guriga noolasha.** Guriga nolosha waxaa loola jeedaa guri muddadiisu ay ku egtahay nolosha qofka haysta mulkiilenimada ama qof kale.

(a) Qabsashada guri noolasha si u ah degaanka assaasiga ah ee la galiyey amaanaad (trust) ama lagu wareejiyey mid kale waa guri noolasha.

(b) Danta ka faa'iidaysiga ee amaanaada (trust) waxaa loo tixgeliyaa guriga noolasha ee daganaha ee amaanaada (trust) ee dib looga qaadi karo ama aan dib looga qaadi karin kaas oo uu naftiisa/nafteeda u siinayo danta ka faa'iidaysiga si toos ah ee degaankiisa/gurigiisa assaasiga ah, ama qeybta amaanaada (trust) ee ka kooban gurigiisa/degaankiisa shakhsi ahaaneed, ugu yaraan muddada noloshiisa ama nolosheeda oo dhan.

(c) Danta ka faa'iidaysiga ee amaanaada (trust) ee dib looga qaadi karin waxaa loo tixgeliyaa guriga noolasha, ama heshiiska kirada ee noolasha oo dhan ah ee ka faa'iidaystaha la siiyay danta ka faa'iidaysiga ee matalaysa gurigiisa/gurigeeda asaasiga ah ee loo haysto amaanaad (trust) aan laga qaadi karin, haddii danta ka faa'iidaysiga lagu bixiyo sida hoos imaanaysa qodobka amaanaada (trust) ilaa muddo aan ka yareyn nolosha ka faa'iidaystaha.

**(26) Lahaansho.** Lahaansho waxaa ka mid ah **qandaraaska iibsashada** iyo sidoo kale **kharashka, guriga noolasha** iyoheshiis kiro oo noolasha oo dhan ah. Guri ay leeyihiin bulsho is qabta ama lammaane ahaan u wadaaga guri ama uu leeyahay la-dagane waxaa loo tixgelinayaa in uu leeyahay lamaane walba ama qof kasta oo guriga la wadaaga ama guri la-dagane walba.